# Baaq Oggolaasho

**Falanqaynta macluumaadka shakhsiga**

**Waxaan oggolahay, inuu adeegga dhalinta soo galootiga Jugendmigrationsdienst (JMD)**

---

**Macluumaadkayga shakhsiga – sida ku xusan ogaysiiskan hawgal falanqayn- lagu sameeyn karo.**

**Tilmaaminta falanqaynta xogta ayaa la ii sharxay, gaar ahaan waxaa la ii sheegay arinta ku saabsan nooca iyo ujeeddada xogta falanqaynteeda iyo xuquuqdayda inaan waqti kasta ka noqon karo oggolaanshahan. Dib u noqoshadu waxay khusaysaa mustaqbalka. Xaqiijinta xogtayda illaa inta aan ka soo tagayo ay tahay sharci.**

**Waan ogahay in aan diidi karo falanqaynta xogta wakhti kasta - marka loo eego shuruudaha ku xusan tilmaamaha xogta xogta.**

**Waan fahmay ogolaanshaha. Su'aalo furan ayaa la iiga wada hadlay.**

**Magaca shakhsiga:** _____
(Vorname)

**Magaca qoyska:** _____
(Nachname)

_____
Degmo, Taariikh
(Ort, Datum)

_____
Saxiixa qofka dhalinyarada ah
(Unterschrift des jungen Menschen)

# Ogaysiin ku saabsan falanqaynta macluumaadka

**Waxaa wehlinaaya adeegga dhaliyarada soo-galootiga**

| | |
|---|---|
| **Magaca/Ka faalo qaadaha adeegga dhalinyarada soo-galootiga (JMD):**<br><br>(Name/Träger des Jugendmigrationsdienstes) | |
| **Xogta xiriirka shaqaalaha-JMD:**<br><br>(Kontaktdaten des*der JMD-Mitarbeiter*in) | |
| **Xogta xiriirka masuulka ilaaliyaha macluumaadka:**<br><br>(Kontaktdaten des*der Datenschutzbeauftragten) | |

Qodobka Xeerka Ilaalinta Macluumaadka ee Kaniisadda Injiiliyada ee Jarmalka (DSG-EKD) ee ku xusan caddaynta soo socota waxaa keliya qusaysaa adeegga dhalinyarada soo-galootiga ee hoos yimaado kaniisadaha injiiliyada, kuwa ku saabsan qodobbka Xeerka Ilaalinta Macluumaadka ee Kaniisadda Katooliga (KDG) waxay quseeyaan oo keliya haddii ay hoos yimaadaan Kaniisada katoliga. Haddii aanay kiisku sidan ahayn labadaba kuwani ma quseeyaan oo waxaa lagu dhaqmayaa xeerarka shuruucda guud ee la soo sheegay, sida tusaale ahaan xeerka ilaalinta xogta EU-da (DSGVO) iyo sharciga ilaalinta xogta federaalka (BDSG).

Adeeggaha dhalinyarada soo-galootiga ee kor ku xusan ayaa hoosta ku taxan **(fadlan sax ku dhig sida ku haboon):**

- ☐ Kaniisad u qaabilsan majirto (keine kirchliche Trägerschaft)
- ☐ Waxaa qaabilsan Kaniisada Injiliyada (Evangelische kirchliche Trägerschaft)
- ☐ Waxaa qaabilsan Kaniisada Katooliga (Katholische kirchliche Trägerschaft)

**1. Ujeedada falanqaynta macluumaadka**

Shaqaalaha kor ku xusan ee adeegga dhalinyarada soo-galootiga JMD iyo / ama wakiilkiisa ayaa i taageeraya si aan lu qabsado Jarmalka. Tani waxay isaga / iyada sameeynaysaa faylka elektaroonigga ah ee kumbuyuutarka "JMD i-mpuls" iyo haddii loo baahdo fayl-kiis warqad ah. Iyagoo lagu keydinayo macluumaadka shakhsi ahaaneed ee igu saabsan sida waafaqsan DSGVO, BDSG ama, haddii loo baahdo, shuruucda kale ee ilaalinta xogta (sida DSG-EKD, KDG ama xeerarka ilaalada maclummadka gobolka). Intaas waxaa sii dheer, xogta aan soo ururiyey waxaa loo isticmaalaa sahanka tirakoobka, qiimeynta tirakoobka waxaa lagu sameeyaa oo kaliya si qarsoodi ah oo aan la magacaabayn.

**2. Baaxada falanqaynta macluumaadka / Ikhtiyaariga**

Nooca iyo baaxada xogta waxay ku xiran tahay macluumaadka aan siiyay shaqaalaha JMD. Intaa waxaa dheer, xogta gaar ahaaneed u qalma ilaalinta macluumaadka, tusaale ahaan. ku saabsan tirinta asalka jinsiyada (Qodobbka. 9 DSGVO; § 13 DSG-EKD; § 11 KDG).

Macluumaadka waxaa JMD siinaya aniga shakhsi ahaan. Macluumaadka waa ikhtiyaari. Haddii aan macluumaadka bixiyo, waxaan ka raali ahay farsamaynta, ujeedooyinka lagu sheegay qoraalka tilmaamahan. Haddii aan diido macluumaadka, waxa kaliya oo aan heli karaa talo; Ka mid noqoshada maaraynta kiisku ma'aha mid suurtogal ah.

**3. Gundhig sharciyeedka falanqaynta macluumaadka**

Falanqaynta macluumaadka shakhsi ahaaneed waxay u dhacdaa ugu horreynba si loo dhammaystiro ama loo bilaabo xidhiidhka latalinta ee u dhaxeeya aniga iyo JMD taageerada inta lagu jiro isdhexgalka (Qodobbka 6 farqada 1 lit. b DSGVO; § 6 farqada 1 lr. 5 DSG-EKD; § 6 farqada 1 lit. c KDG) iyo sidoo kale iyada oo ay ugu wacan tahay baahida loo qabo fulinta danta dadweynaha JMD (Qodobka 6 (1) (e) DSGVO, § 6 (1) lr. 3 DSG-EKD; Para 1 lit. F KDG). Marka laga reebo, falanqaynta xogta waxay ku saleysan tahay oggolaanshaheyga halkan ku qoran (Qodobka 6 (1) (a), 9 (2) (a) GDPR, §§ 6 (1) (2), 13 (2) (1) ee GDPL). EKD, § 6 (1) (b), 11 (2) (a) KDG).

**4. Kala duwanaashaha dadka macluumaadka qaata**

Xubnaha shaqaalaha JMD iyo / ama asxaabteeda / asxaabaheeda JMD waxay kayd gareeyn karaan, ku shaqayn karaan iyo qiimeyn karaan macluumaadkayga shaqsiyadeed. JMD waxay caawinaad ooga baahan tahay shirkadaha ka shaqeeya serverka iyo software kaas oo kaydinaya xogtayda gaarka ah. Kuwani waa shirkadda Intevation GmbH / Osnabrück (loogu talagalay software) iyo shirkadda Hostway Deutschland GmbH (ee server-yada). Shirkadahani waxay arki karaan xogtayda gaarka ah keliya mamar dhif ah oo aan caadiga ahayn iyo sida kaliya ee waafaqsan xakamaynta JMD iyo marnaba ma gudbinayaan. Barnaamijka waxaa maalgeliya Wasaaradda Federaalka ee Qoyska, Muwaadiniinta Waayeelka ah, Haweenka iyo Dhalinyarada (BMFSFJ). Ujeedo qiimeyn iyo horumarin barnaamijka (BMFSFJ) awgiis, waxaa nuqul qarsoon Ah ee faylka kiiskeyga loo gudbinayaa server-ka dhexe. Qiimeynta marka la sameeynaayo lama ogaankaro wax ku saabsan faylka kiiskeyga ama shakhsigayga. Server-ka waxaa gacanta ku haya JMD, Xafiiska Adeegga Socdaalka Dhalinyarada iyo Hay'ada (BMFSFJ).

**5. Muddada macluumaadka la kaydinayo**

Macluumaadka shakhsiyeed waxaa laga tirtiri doonaa faylka kiiska kadib dhammaadkii taageeradayda JMD, tan kaddibna waa la aqoonsaday. Nuqulka CD-ga ah oo ka mid ah faylka kiiskeyga ayaa lagu qori doonaa 5 usbuuc ka dib, xogta shakhsiyeed lama soo celin doono. Xogta soo hadhay waa qarsoodi qofna laguma hagaajin karo. Dammaanad dheeraad ah oo ku saabsan xogta waxaa laga yaabaa in loo baahdo iyadoo la xidhiidha maxkamadaynta iyo in la xaqiijiyo caddaynta hoos timaada xaddidaadaha. Gaar ahaan, muddada xaddidaadda ee saddexda sano ah ee caadiga ah waa in la tixgeliyaa, laakiin xaaladaha xaddidan ee shakhsi ahaaneed waxay noqon karaan ilaa 30 sano.

Muddooyinka kor lagu xusay waan in la tixgaliyo in waqtiga xaqiiqada ah ee Tirtiritaanka ama Koobida falanqaynta sababo xakamayn oo kala duwan dartood inay dhici karto in muddooyinka ay aad dib ugu dhici karaan.

Sabab kala duwanaasho awgeed isku-shaandheyn  loogu talogalay racfaan ku saabsan waajibaadka kaydinta iyo bilowga, macluumaadka saxda ah ee ku saabsan mudada kaydinta iyo tirtirida macluumaadka kaliya ayaa la bixin karaa marka la codsado kiisas shaqsiyeed. Markaan tixraacno waxaan kuu gudbinaynaa xuquuqdaada macluumaadkaaga ee lagu soo bandhigay qaybta soo socota.

**6. Xaquuqdayda**

Haddii aan rabo, xubin ka mid ah shaqaalaha JMD waa inay i tusaan macluumaadka ay ku qoran yihiin aniga (Qodobka  15 DSGVO; § 19 DSG-EKD; § 17 KDG). Macluumaadka aan khalad ahayn ee igu saabsan waa in ay saxaan shaqaalaha JMD (Qodobka 16 DSGVO; § 20 DSG-EKD; § 18 KDG). Xaaladaha qaarkood, waxaan xaq u leeyahay inaan haysto xogtayda la tirtiray, ama xaddidid shaqo. Xaaladaha arrintani waxay ku qornayd qoraalada Qodobbka 17 ama 18 ee DSGVO, ama §§ 21; 22 DSG-EKG ama §§ 19; 20 KDG ayaa xukuntay. Xaaladaha noocaas ah, waxaan sidoo kale u baahan karaa in dhammaan dadka qaata xogta la ogeysiiyo tirtirka xogta ama xaddidaadda wax soo saarka. Xaaladaha qaarkood, waxaan xaq u leeyahay inaan haysto xogta aan soo ururiyey ee aan bixiyay qaab habaysan, mid caadi ah iyo qaab mashiinka lagu akhrisan karo (Qodobbka 20 DSGVO; § 24 DSG-EKD; § 22 KDG).

Haddii aanan rabin in macluumaadkayga lagu shaqeeyo iyada oo ku saleysan oggolaanshahan, waan ka noqon karaa oggolaanshahaan waqti kasta (Qodobka 7 farqada 3 DSGVO; § 11 farqada 3 DSG-EKD; § 8 farqada 6 KDG). Dib u noqoshadu waxay khusaysaa mustaqbalka. Xaqiijinta xogtayda illaa inta aan ka soo tagayo ay tahay sharci. Haddii aan ka fikiro in falanqaynta xogtayda ay ku xadgudubtay sharciga ilaalinta macluumaadka, waxaan xaq u leeyahay in aan u dacwoono hey'ad kormeer (Qodobbka 77 DSGVO; § 46 DSG-EKD; § 48 KDG).

Liiska hay'adaha kormeerka sameeya cinwaanka waxaa laga heli karaa:
https://www.bfdi.bund.de/DE/Infothek/Anschriften_Links/anschriften_links-node.html.

**7. Xaquuqdayda ka laabashada**

Waxaan xaq u leeyahay mar walba inaan ka laabto fasaxida xogtayda sida ku cad Qodobbka 21 DSGVO; § 25 DSG-EKD; § 23 KDG si looga hortago. Tani waxay khuseysaa haddii macluumaadkeyga shakhsiyeed uu ku saleysan yahay

- Qodobbka 6 farqada 1 S. 1 lit. e DSGVO (fulinta hawsha danaha dadweynaha) ama
- Qodobbka 6 farqada 1 S. 1 lit. f DSGVO (Ilaalinta danaha sharciga ah ee kantaroolaha ama cid saddexaad) ama
- § 6 farqada 1 lr. 1 DSG-EKD (shuruuc sharci ah waxay u ogolaaneysaa falanqaynta xogta shakhsi ahaaneed ama ku meelaynaysa) ama
- § 6 farqada 1aad lr. 3 DSG-EKD (fulinta hawlaha hay'adda masuulka ka ah) ama
- § 6 Abs farqada 1 lr. 4 DSG-EKD (fulin shaqo kale, oo ku jirta danta kaniisadda) ama
- § 6 farqada 1aad lr. 8 DSG-EKD (ilaalinta danaha sharciga ah ee dhinac saddexaad) ama
- § 6 farqada 1 lit. f) KDG (qabashada howl hawleed ee danta kaniisadda) ama
- § 6 farqada 1 lit. g KDG (ilaalinta danaha sharciga ah ee qofka mas'uulka ka ah ama cid saddexaad)

Sidoo kale waa shardi ah in ay jiraan sababo is burinaya oo ka timaada xaaladeyda gaarka ah.

Wakhti kasta iyo iyada oo aan la siin sababo, waxaan diidi karaa habka xogtayda marka loo adeegsado waraaq toos ah ama lacag ururinta.

Ka laabashada sidoo kale waxayu khuseeyaa wixii qormooyin ah ee la xidhiidha ujeedooyinka ka sarreeya.